




PreK 4 ME Family Links  
**CUTUBKA 3: DABAYSHA IYO**

**Dulmarka Cutubka 3: Dabaysha iyo Biyaha**


Markaan biloowno Cutubka 3, waxaan sii wadaynaa barashada iyo dhisida xirfadaha bulshanimada ee aan baranaynay sanadkaan. Waxaan bilaabaynaa waxbarasho cusub oo lagu saleeyay sayniska, taasoo ay ku jiraan barashada cimilada iyo sida ay u saamayn karto dadka xayawaanada labadaba. Waxaan samayn doonaa qiyaasaad waxaana baran doonaa fikradaha sayniska oo qaabab kaladuwan oo badan leh! Waxaan sii wadaynaa barashada erayada laxanka, dhawaaqyada xarfaha iyo fikradaha wax tirinta ee fasalka anagoo samaynayna shaqada-gacanta iyo ciyaarta wadagaa ah. Cutubkaan wuxuu soo koobayaa "Waxbarashadeena Tusaalaynta" ayadoo waqti loo siinaayo ardaydeena muujinta waxay barten inta lagu jiro Cutubka Dabaysha iyo Biyaha. Akhri si aad u hesho xog dheeraad ah!

**BUGAAGTA MURAAJACADA ee Cutubka 3**




*Gilberto and the Wind*

Waxaa qoray: Marie Hall Ets




*Rabbits and Raindrops*

Waxaa qoray: Jim Arnosky



*The Snowy Day*

Waxaa qoray: Ezra Jack Keats



*Thunder cake*

Waxaay qortay Patricia Polacco

Sawiro lagasoo dajiyay amazon.com

**Ciwaanada kale ee bishaan waxaa ku jira...**

**Time for Bed Oo ay qortay Mem Fox**

**A Hat for Minerva Louise**

**Oo ay qortay Janet Morgan Stoeke**

**Living Things Need Water**

**Oo ay qortay Bobbie Kalman**

**Swimmy Oo ay qortay Leo Lionni**

**Heesaha, Ciyaarta Erayga iyo Xarfaha**

Tani waa luuqda laxamaynta iyo dheesha ee aan ku baranayno fasalka—la samee ilmahaaga una sheeg inyy ku tusiyo dhaqdhaqaaqa gacmaha!

**Toban Farood oo Yaryar**

Waxaan leeyahay toban farood oo yaryar, dhammaantoodna anaa leh. (faraha kor u taag)

Waxaad ku samayn karaa waxyaabo. Ma doonaysaa inaad aragto?

Waan isku dhajin karaa, Ama dhamaantood waan kala furi karaa,

Waan isku dari karaa, Ama dhammaantood waan qarin karaa.

Kor ayaan u bootin karaa,

Hoos ayaan u bootin karaa,

Si dagan ayaan iskugu laabi karaa, Waxaana kuligood u hayn karaa sidaas.



Sawir lagasoo qaatay Pixabay

**Arag bogga kale si aad u aragto nashaadaadka guriga**



# Waxbarashada leh Nashaadaadka Dheeraadka ah Gee Guriga!

## Heerarka Sayniska, Qaabka Waxbarashada, Xisaabta iyo Luuqad aiyo Fanka

### Quus ama Dabaalo

Tani waa shaqadaan ku samaynayno fasalka waadna ku kordhin kartaa markaad guriga joogtaan. Ka caawi ilmahaaga inay soo aruuriso 10 sheey oo yaryar iyo tuubo yar oo biyo ah. U sheeg ilmahaaga inuu tiriyo, asagoo tilmaamaaya sheey kasta intuu tirinaayo.

Waydii ilmahaaga su'aalo ku saabsan in sheey kasta oo quusaayo, ama dabaalanaayo marka lagu rido biyaha. Waydii inuu sharxo qiyaasaadkiisa. Waxaad sidoo kale u sheegi kartaa inuu qoro liiska alaabaha quusaaya ama kuwa dabaalanaaya kadibna uu ka hadlo sababta ay tahay in sheeygu u quusay ama u dabaashay.

## Heerarka Sayniska, Dhaqdhaqaaqa lafaha iyo Fahanka

### Abuur Shaxda Cimilada

Adoo adeegsanaaya shaxda hoose, u sheeg ilmahaaga inuu sawiro nooc-ada cimilada. Ka caawi inuu ku asteeyo sawir kasta erayga cimilada loogu yeero. Kala hadal waxa ilmahaagu ku arko banaanka albaabka ama daaqada subixii, kadibna waafaji cimilada maalintaas jirta midda sawirka ka muuqata. Ka hadal daruuraha, heerkulka, roobka ama barafka!


## Farshaxan Hal abuur leh, Saynis, Dhaqdhaqaaqa lafaha, Heerarka Qaabka Waxbarashada oo waajahaayo

### Dhoobada Daruuraha

Adoo adeegsanaaya mid ama labo kamid ah qaybaha hoose, ayadoo ku xiran qaybaha aad haysato, adigga iyo ilmahaaga ayaa samayn kara dhoobada daruuro!

1. Dhoobada Daruurta: 2 Koob oo bur ah iyo 1/4 koob oo saliid ah (midda khudaarta, saliid saytuun, saliidaha ilmaha ayaad midkaad doonto adeegsan kartaa!) Iskuqas oo bilooow samaynta dhoobada!
2. Riinjiga daruurta: si tartiib ah ugu qas 1 Koob oo aburka kareenka lagu xiidho ah iyo 1/3 Koob oo koolo caano ah. Riinjigaan aburka leh ayaa xoor ahaan u qalalaya—sida daruuraha!

Sawir lagasoo qaaday brigidssdailylessonlog.blogspot.com



Kalmar ku socota waalidiinta iyo qoysaska: Jirar caafimaad Leh

Waxaa jira qaabab badan oo carruurta loo baro caafimaad qabka. Halkan waxaad ka helayaa dhawr tilmaamood oo wanaagsan oo kasoo baxay CDC:

- ⇒ La cun cuntada ilmahaaga markay suuragalayso. U daa cunugaagu ha daawadee sidaad u cunayso miraha, khudaarta, iyo haruurka guud xiliyada cuntada iyo cuntooyinka fudud. Cunugaagu waa inuu cunaa uuna cabaa kaliya cadad yar oo cunto iyo cabitaan ah oo ay ku jirto sonkor, dufanka xayrta ah, iyo cusbada.
- ⇒ Ka fogee taleefishinada qolka jifka ilmahaaga. Udaji waqti cayiman daawashada shaashada ee ilmahaaga adoo kusoo koobaaya waxaan ka badnayn 1 saac maalintii si uu u daawado barnaamij tayo leh, intuu guriga joogo, dug-siga, ama daryeelka dugsiga kadib aadna u abuurto qorshaha adeegsiga warbaahinta ee qoyskaaga.
- ⇒ Sii ilmahaaga qalabka ciyaarta oo ku haboon da'diisa, sida kubadaha iyo usha kubada ee caaga ah, laakiin u ogo-loow ilmahaaga dugsiga barbaarinta ku jira inuu doorto waxa uu ciyaarayao. Arintaan ayaa uga dhigaysa socodka iyo firfircoonaanta cunugaaga yar mid baashaal leh.
- ⇒ Xaqiiji in cunugaagu helo mudada lagu taliyay ee hurdada habayn kasta: Ilmaha dugsiga barbaarinta ee 3-5 sano jirka ah, 10–13 saacadood 24 kii saacba (ayna ku jiraan hurdooyinka fudud)